Helsinki



# Buug tilmaamaha S2 ee ardayga iskuulka sare ee Helsinki iyo waalidiintooda

**Waa maxay macnaha manhajka S2?**
Afka hooyo iyo suugaantu waa maddo ay wadaagaan dhammaan ardayda. Waxaa lagu dhammayn karaa iyadoo la baranayo luqadda Finnish-ka (S1) ama Finnish-ka sidii luqad labaad (S2).

**Yaa manhajka S2 lagula talinayaa?**
S2 waxaa loogu talagalay ardayda

- afkooda hooyo uusan ahayn Finnish, Iswiidish ama Saami IYO
- kuwaas oo xirfadahooda luqadeed ay leeyihiin cillado cad

S2 sidoo kale waxay quseysaa ardayda leh asal luqado badan.

**Tusaalooyin:**

- Ardaygu si fiican buu ugu hadlaa Finnish-ka balse akhriska iyo qorista (gaar ahaan Finnish-ka) ayaa ku culus. ▶ Manhajka S2 ayaa lagula talinayaa.
- Ardaygu wuu qori karaa Finnish-ka balse fahamka akhriska weli way ku adag tahay. Qoritaanka weedhadhka dhaadheer iyo fahamka tilmaamaha hawlaha way ku adag tahay. ▶ Manhajka S2 ayaa lagula talinayaa.
- Ardaygu wuxuu leeyahay asal luqado badan laakiin wuxuu soo dhigtay iskuulka hoose ee wadankan wuxuuna si wanaagsan u akhriyaa oo u qoraa weedhadhka dhaadheer. ▶ Manhajka S1 ayaa lagula talinayaa.

**Manhajka S2 ma kaa diidayaa inaad codsato waxbarasho sare?**
Ardayda S2 waxay u codsan karaan waxbarashada sare si la mid ah ardayda S1. Darajada imtixaanka shahaadiga ah ee S2 waxay qiimihiisu tahay tiro la mid ah buundooyinka imtixaanka S1.

**Yaa go'aaminaya doorashada manhajka?**
Macallinka iskuulka sare ee S2, la-taliyaha waxbarashada, iyo maamulaha ayaa ka caawin doona doorashada. Doorashada waxaa samaynaya ardayga iyo waalidkiisa. Ardaygii 18 jirsaday ayaa isagu dooran kara.

**Goorma ayaa la dooranayaa oo ma la beddeli karaa xilliga iskuulka sare uu socdo?**
Doorashada waxaa la samaynayaa sannadka ugu horeeya ee iskuulka sare. Haddii loo baahdo in wax laga baddalo manhajka sannadka ugu horeeya, go'aanka waxaa si wadajir ah u go'aaminaya ardayga, waalidka iyo iskuulka sare.